

# Ku soo dhowow waxbarasho-horaadka!

## Macluumaad mas' uulka loogu talagalay oo ku saabsan helidda waxbarasho-horaadka

Ilmo kastaa wuxuu waxbarasho horaadka ka qaybqaadanayaa hal sano kahor intaanu bilaabin mas'uuliyadda waxbarashada. Ilmaha dhashay 2020-ka waxbarasho-horaadku waxaay u bilaabmaysaa bisha agoosto ee 2026. Waxbarasho-horaadka dhigashadiisu waa waajib waana lacag la'aan. Waxbarasho-horaadka waxaa la qabanqaabiyaa afar saacadood maalintii, badanaa inta u dhaxeysa 8.30-13.30. Helsinki waxbarasho-horaadka waxaa ku bixiya waaxyaha barbaarin-horaadka ee dowladdu leedahay iyo kuwa gaar loo leeyahay ba.

Barbaarin-horaadka buuxinta ah waxaa loola jeedaa inuu ilmuhu xanaanada joogo kahor ama kaddib wakhtiga waxbarasho-horaadka. Barbaarin-horaadka la buuxinayo waxaa lagu qabanqaabinayaa guud ahaan isla goobta iyo kooxda ilmuhu uu ku helayo waxbarasho-horaadka.

Haddii ilmuhu uu soo maray barbaarin-horaadka degmada intaanu waxbarasho-horaadka bilaabin uma baahnid inaad gaar uga diiwaan galiso barbaarin-horaadka buuxinta ah. Baaxadda barbaarin-horaadka iyo wakhtiga isbeddelada la xidhiidha waxaad kala xidhiidhi kartaa maamulaha xanaanada, markaad qaabisho booska waxbarasho-horaadka.

## Ilmuhu wuxuu ku jiraa barbaarin-horaadka degmada

Ilmahaagu si toos ah ayuu boos uga helayaa waxbarasho-horaadka degmada haddii uu ku jiro barbaarin-horaadka degmada. Booska waxaa lagu diiwaan galinayaa nidaamka adeegga Asti. Boosaska waxbarasho-horaadka waxaa lagu bixinayaa iyadoo lagu saleynayo cinwaanka qofka u shaqaynaya 22.1.2026.

Adiga oo waalidka ilmaha ah waa inaad aqbashaa ama diiddaa ilmahaaga booska waxbarasho-horaadka ee loo qabtay ugu dambeyn 13.-27. febraayo 2026. Waxaad helaysaa go'aanka waxbarasho-horaadka ee ilmahaaga ugu dambeyn dhammaadka bisha Maarso ee 2026. Macluumaad dheeraad ah oo khuseeya qabanqaabinta waxbarasho-horaadka waxaad ka heli kartaa cinwaanka hel.fi/esiopetus. Boosaska kooxaha waxbarasho-horaadka waxaa lagu qaybinayaa soonaha ardey qaadashada iyadoo qiimeynta lagu darsanayo dugsiga ugu dhow meesha uu ilmuhu degganyahay.

Boosaska kooxaha waxbarasho-horaadka waxaa sidoo kale lagu qaybin karaa meel ka baxsan deeganka ilmaha iyadoo tusaale ahaan lagu salleynayo baahida taageero ee ilmaha, barashada af iswidhishka ama waxbarasho-horaadka maalinta oo dhan ah inuu u baahanyahay darteed.



# **Xanaanada gaarka ah, waxqabadka kooxaha ama xanaaneynta guriga carruurta ku jira**

Xanaanada gaarka ah, waxqabadka kooxaha ama xanaaneynta guriga carruurta ku jira waalidkii markaad tahay waxaad ilmaha ka diiwaangalin kartaa waxbrasho-horaadka degmada 7.-21. Jannaayo 2026 inta u dhexeysa adeegga Asti adiga oo isticmaalaya. Waxaad helaysaa go'aanka waxbarasho-horaadka ee ilmahaaga ugu dambeyn dhammaadka bisha Maarso ee 2026.

Waxaad sidoo kale booska waxbarasho-horaadka ka codsan kartaa xanaanada gaarka. Codsiyada booska waxbarasho-horaadka ee lagu qabanqaabinayo goob gaar ah waa in si toos ah loogu dirsadaa goobtaas waxbarasho-horaadka qabanqaabinaysa ee aad rabto inaad codsato. Macluumaad dheeraad ah oo khuseeya xanaanooyinka waxaad ka heli kartaa cinwaanka [hel.fi/esiopetus](http://hel.fi/esiopetus).

